

**XAAHSI TILMAAN-BIXINEED**

Siduu u kala Horreeyo Hannaanka Rumeysiga Ilkaha

Carruur fara badan ayaa u baahan taageero markay baranayaan xirfado cusub. In loo kala qaado xirfad tallaaboooyin aad u yarna waxay ilmaha ka caawin kartaa inuu barto halkii marba hal tallaabo. Tiro ahaan inta tallaabo oo xirfad ama hawl loo kala qaadayana waxay ku xiran tahay baahida ilmahaaga.

Waxaa suurtagal ah inaad siiso ilmahaaga nidaam muuqaal ah oo kala horreeya. Taasina asal ahaan waxa weeye sawirro taxane ah oo ku tusinaaya tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah in la dhammasystiro hawl. Wuxaanad isticmaali kartaa sawirro dhab ah, sawirro xarriijin ah, ama astaamo sawirro ah. Marka aad isticmaalayso nidaam muuqaal ah oo kala horreeya, ku dheji meel la siman aragtida indhaha ilmahaaga, fartana ku fiiq sawirkha, oo akhri tallaabada ka hor intaadan dhammaystirin hawsha adigoo adeegsanaya cod aad u sarreya.

Waxaa kale oo aad isticmaali kartaa sawirrada si aad u samaysato ciyaar adiga kuu gooni ah oo leh nidaam kala horeeya. Si hawl yari ah u daabaco sawirrada, kana jar meeshay ku yaallaan, ilmahaaguna haku tababbarto asagoo tallaabooyinku siday isugu xigaan u kala hormarinaya. Waxaa kale oo aad samayn kartaa ciyaar wax la is-waafaqsiiyo adigoo labo nuqul (koobi) ka samaynaya hannanka ay wax isugu xigaan. Si isku mid ahna ugu dheji hal nuqul xaanshida dhismaha (construction Paper) nuqulka kalena ha isticmaalo ilmahaagu si uu isu waafaqsiiyo isulana doonto kaararka isku midka ah.

Halkan waxa ah tusaale muujinaya hannaanka ‘rumeysiga ilkuhu’ u kala horreeyo:

1. Sare u qaad burashka ilkaha.
2. Biyo ku qoo burashka.
3. Furka ka qaad daawada ilkaha lagu rumeysto
4. Buraashka afkiisa ku tuuji daawada ilkaha
5. Qeybta hoose ee ilkaha caday.
6. Qeybta sare ee ilkaha caday.
7. Iska tuf calyada.
8. Biyo ku nadiifi burashka.
9. Buraashka meeshiisa ku celi.
10. Koob soo qabso.
11. Koobka biyo ka buuxi.
12. Ilkaha biyo ku nadiifi (luqluqo)
13. Iska tuf biyaha.
14. Koobka halkiisa ku celi.
15. Afka isaga tir shukumaan (tuwaal).
16. Furka ku xir daawada ilkaha.
17. Daawada ilkaha meesheeda ku celi.

Siduu u kala Horreeyo Hannaanka Rumeysiga Ilkahaa, waa socotaa

Rumeysiga Ilkahaha – I



Sare u qaad buraashka ilkaha



Biyo ku qoo buraashka



Furka ka qaad daawada ilkaha lagu rumeysto



Buraashka afkiisa ku tuuji daawada ilkaha



Qeypta hoose ee ilkaha caday.



Qeypta sare ee ilkaha caday

Siduu u kala Horreeyo Hannaanka Rumeysiga Ilkahaha, waa socotaa

Rumeysiga Ilkahaha – 2



Iska tuf calyada



Biyo ku nadiifi buraaashka



Buraashka meeshiisa ku celi



Koob soo qabso



Koobka biyo ka buuxi



Ilkahaha biyo ku nadiifi (luqluqo)

Siduu u kala Horreeyo Hannaanka Rumeysga Ilkahaha, waa socotaa

Rumeysiga Ilkahaha – 3



Iska tuf biyaha



Koobka halkiisa ku celi



Afka isaga tir shukumaan (tuwaal).



Furka ku xir daawada ilkaha



Daawada ilkaha meesheeda ku celi